

شهادة النبي (صلى الله عليه وسلم) لأصحابه

وبيان فضلهم ، والدروس المستفادة من ذلك.

**Siduu ugu qiray nabiga (NNKH) asxaabtiisa iyo
caddeynta fadligooda, iyo casharrada laga
faa'idaysanayo arrintaas**

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi
u ah kaasoo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(وَالسَّابِقُونَ الْأَوَّلُونَ مِنَ الْمُهَاجِرِينَ وَالْأَنْصَارِ وَالَّذِينَ اتَّبَعُوهُمْ
بِإِحْسَانٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمْ وَرَضُوا عَنْهُ وَأَعَدَّ لَهُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي تَحْتِهَا
الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ فِيهَا أَبَدًا ذَلِكَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ)

(kuwii ku dheereeyay «khayrka» ee horreeyay oo ka
mid ah muhaajiriinta iyo ansaarta iyo kuwii ku raacay
wanaagga Allaa ka raalli noqday iyana way ka raalli
noqdeen, wuxuuna u darbay jannooyin ay socoto
dhexdooda wabiyadii iyagoo ku waari waligood,
taasina waa liibaan wayn)

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee
mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay
addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo
nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa

iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Intaas kaddib:

Siduu Alle ugu doorto risaalooyinkiisa qofka uu doono addoomihiisa – taasoo waafaqsan qaabka uu u abuuray xagga dahaarada qalbiga, saafinimada maskaxda iyo dabciga fiican iyo akhlaaqa sare – Alle (*subaaxanu watacaalaa*) wuxuu u dooraa anbiyadiisa qof ku habboon inuu iyaga la saaxiibo, oo risaaladooda difaaco, risaaladana u guto si dhab iyo amaano iyo hurid leh gadaashooda, Alle wuxuu leeyahay – *subxaanahu* –

(اللَّهُ يَصْطَفِي مِنَ الْمَلَائِكَةِ رُسُلًا وَمِنَ النَّاسِ إِنَّ اللَّهَ سَمِيعٌ بَصِيرٌ)

(Alle wuxuu ka doortaa malaa'igta rasuullo dadkana (rasuullo) Ilaahayna waa maqle arka), sidaa awgeed asxaabta rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – waxay ahaayeen kuwa umadda ugu khayrka badan qalbi ahaan, uguna cilmi badan, uguna yar isku kalifitaan, la yaab ma laha waa dad Ilaahay – *cazza wajalla* – u doortay inay la saaxiibaan nabigiisa - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – iyo diintiisa inay istaajiyaan, caalamkana gaarsiiyaan.

Ka sheekeynta asxaabta nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – waa ka sheekeynta dadka kuwa ugu qiimaha badan anbiyada iyo rususha kaddib, Ibnu Cabbaas waxaa laga wariyay – *Ilaahay raalli haka noqdee* - in laga wado asxaabta nabiga - *naxariis*

iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -, dadka la doortay oo kusoo arooray oraahda Alle:

(قُلِ الْحَمْدُ لِلَّهِ وَسَلَامٌ عَلَىٰ عِبَادِهِ الَّذِينَ اصْطَفَىٰ)

(Dheh mahad Allaa iska leh nabadgalyana ha ahaato addoomadiis uu doortay korkooda) Ibnu Mascuud – *Ilaahay raalli haka noqdee* – wuxuu yiri: (Ilaahay wuxuu eegay quluubta addoomaha wuxuu arkay qalbiga Muxamed - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - inuu yahay kan ugu fiican, marka naftiisa ayuu doortay risaaladiisana ayuu lasoo diray, kaddib wuxuu eegay quluubta addoomaha qalbiga Muxamed - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - kaddib wuxuu arkay quluubta asxaabtiisa inay ugu fiican yihiin, marka wuxuu ka dhigay taageereyaasha nabigiisa, diintiisa ayay difaacayaan, wixii muslimiinta ay u arkaan wanaag, Alle agtiisa wuxuu ka yahay wanaag, wixii ay u arkaanna inuu xun yahay, Alle agtiisa wuxuu ka yahay wax xun) (musnad Axmed).

Waxaan shaki ku jirin qofka kitaabka Alle – *cazza wajalla* – fiirfiiriyo wuxuu ogaanayaa sarreynta darajada asxaabta nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – iyo sarreynta qiimahooda iyo weynida fadligooda, waa kuwa Ilaahay – *cazza wajalla* - raalli ka noqday oo uu iimaanka dhabta ugu markhaati kacay, Alle wuxuu leeyahay – *subxaanahu* - :

(لَقَدْ رَضِيَ اللَّهُ عَنِ الْمُؤْمِنِينَ إِذْ يُبَايِعُونَكَ تَحْتَ الشَّجَرَةِ فَعَلِمَ مَا فِي قُلُوبِهِمْ فَأَنْزَلَ السَّكِينَةَ عَلَيْهِمْ وَأَثَابَهُمْ فَتْحًا قَرِيبًا)

(Alle wuu ka raalli noqday mu'miniinta markay kugula ballantamayeen geedka hoostiisa, Allana waa ogaaday waxa quluubtooda ku sugan, wuxuuna ku dajiyay xasillooni, wuxuuna ku abaalmarin furasho dhaw), Culimada tafsiirka waxay dhaheen: aayadda: (Allana waa ogaaday waxa quluubtooda ku sugan) waxaa laga wadaa sabarka iyo runta iyo daacadnimada iyo maqalka iyo adeecidda, iyo aragtidooda wanaagsan ay ku arkayeen xaqqa oo Ilaahay ku hanuuniyay.

Ilaahay wuxuu ku taskiyeeyay asxaabta *rasuulka* - *naxariis* iyo *nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – meelo badan ee kitaabkiisa kariimka, waxaa ka mid ah:

(الَّذِينَ اسْتَجَابُوا لِلَّهِ وَالرَّسُولِ مِنْ بَعْدِ مَا أَصَابَهُمُ الْقَرْحُ لِلَّذِينَ أَحْسَنُوا مِنْهُمْ وَاتَّقُوا أَجْرٌ عَظِيمٌ * الَّذِينَ قَالَ لَهُمُ النَّاسُ إِنَّ النَّاسَ قَدْ جَمَعُوا لَكُمْ فَاخْشَوْهُمْ فَزَادَهُمْ إِيمَانًا وَقَالُوا حَسْبُنَا اللَّهُ وَنِعْمَ الْوَكِيلُ * فَانْقَلَبُوا بِنِعْمَةٍ مِّنَ اللَّهِ وَفَضْلٍ لَّمْ يَمَسَّهْمُ سُوءٌ وَاتَّبَعُوا رِضْوَانَ اللَّهِ وَاللَّهُ ذُو فَضْلٍ عَظِيمٍ)

(Ee ah kuwa ajiibay (maqalay) Alle iyo Rasuulka marka dhaawac soo gaaray kaddib kuwa wanaag falay oo ka

mid ah oo dhawrsaday waxaa u sugnaaday ajar weyn * ee ah kuwa dadku ku dhahay dadkii baa idiin kulmay ee ka cabsada iimaan buu u kordhiyay, waxayna dhaheen midka nagu filan waa Ilaahay isagaana u fiican wakiil * waxay la noqdeen nicmo xagga Alle ka timid iyo fadli dhibna masoo gaarin waxayna raaceen raalli ahaanshaha Alle, Ilaahayna waa fadli wayn lahaade), iyo oraahda Alle markuu ka hadlayay muhaajiriinta iyo ansaarta arrintooda:

(لِلْفُقَرَاءِ الْمُهَاجِرِينَ الَّذِينَ أُخْرِجُوا مِنْ دِيَارِهِمْ وَأَمْوَالِهِمْ يَبْتَغُونَ
فَضْلًا مِنَ اللَّهِ وَرِضْوَانًا وَيَنْصُرُونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ أُولَئِكَ هُمُ الصَّادِقُونَ *
وَالَّذِينَ تَبَوَّءُوا الدَّارَ وَالْإِيمَانَ مِنْ قَبْلِهِمْ يُحِبُّونَ مَنْ هَاجَرَ إِلَيْهِمْ وَلَا
يَجِدُونَ فِي صُدُورِهِمْ حَاجَةً مِمَّا أُوتُوا وَيُؤْثِرُونَ عَلَىٰ أَنْفُسِهِمْ وَلَوْ كَانَ
بِهِمْ خِصَاصَةٌ وَمَنْ يُوقِ شُحَّ نَفْسِهِ فَأُولَئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ)

(Waxaa xoolahaas wax ku leh kuwa saboolka ah ee ka soo hijrooday guryahoodii iyo xoolahoodii dar Alle iyo gargaarka Ilaahay iyo Rasuulkiisa, waana kuwa ku run sheegay iimaankooda * kuwii madiino deganaa ee xaqa rumeeyay waxay jecel yihiin dadka u soo hijroon (u soo qixi) wax neceyb ahna laabta uma geliyaan dadkaas waxay siin, waxayna naftooda ka hormariyaan (ay uga doori) dadkaas xitaa haddii gaajo ay hayso

ruuxii laga dhawro bakhaylnimada naftiisa waa mid liibaanay)

Siday aayadaha Qur'aanka xakiimka u yimaadeen si ay ugu waariyaan xuska asxaabta nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - ammaan midda ugu xeeldheer uguna caraf badan, qadarin midda ugu weyn uguna qurux badan, axaadiista nabawiga oo saxiixa ah ayaa ka markhaati ah darajadooda rasuulkii Alle - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - agtiisa, waxayna caddeynayaan huritaankooda, waxayna muujinayaan go'aankooda dhabta ah, waa kuwa taageeray una gaargaaray oo raacay nuurka lala soo dejiyay, kana hormariyay jacaylkiisa jacaylka naftooda iyo kan ehelkooda iyo jacaylka dadkoo dhan, nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu siiyay billad tan ugu fiican, wuxuuna sharfay sharfidda ugu sarreysa, meelo badan qiimo leh ayuu ugu qiray, wuxuu yiri :

(خَيْرُ النَّاسِ قَرْنِي ، ثُمَّ الَّذِينَ يَلُونَهُمْ ، ثُمَّ الَّذِينَ يَلُونَهُمْ)

(Dadka waxaa ugu khayr badan qarnigayga kaddib ku ku xiga kaddibna kuwa ku xiga) (Bukhaari iyo Muslim), sidoo kale nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu leeyahay:

(النُّجُومُ أَمَنَةٌ لِلسَّمَاءِ ، فَإِذَا ذَهَبَتِ النُّجُومُ أَتَى السَّمَاءَ مَا تُوعَدُ ،
وَأَنَا أَمَنَةٌ لِأَصْحَابِي ، فَإِذَا ذَهَبَتْ أَتَى أَصْحَابِي مَا يُوعَدُونَ ،
وَأَصْحَابِي أَمَنَةٌ لِأُمَّتِي ، فَإِذَا ذَهَبَ أَصْحَابِي أَتَى أُمَّتِي مَا يُوعَدُونَ)

(Xiddigaha cirka waxay u yihiin amaan, hadday tagaan xiddigaha waxaa u imaanaya cirka wixii loo yaboohay, anigana waxaan u ahay asxaabtayda amaan, haddii aan tago waxaa u imaanaya asxaabtayda wixii loo yaboohay, asxaabtaydana amaan ayay u yihiin ummadayda, hadday tagaan asxaabtayda ummadayda waxaa u imaanaya wixii loo yaboohay) (Saxiix Muslim), wuxuu leeyahay Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - :

(لَا تَزَالُونَ بِخَيْرٍ مَا دَامَ فِيكُمْ مَنْ رَأَى مِنْ رَأْيِي وَصَاحِبِي ، وَاللَّهِ لَا تَزَالُونَ
بِخَيْرٍ مَا دَامَ فِيكُمْ مَنْ رَأَى مِنْ رَأْيِي ، وَصَاحِبَ مَنْ صَاحِبِي ، وَاللَّهِ
لَا تَزَالُونَ بِخَيْرٍ مَا دَامَ فِيكُمْ مَنْ رَأَى مِنْ رَأْيِي مَنْ رَأَى مِنْ رَأْيِي ، وَصَاحِبَ مَنْ
صَاحِبَ مَنْ صَاحِبِي)

(kama suulaysaan khayr inta uu idin ku jiro qof aniga i arkay oo ila saaxiibay, wallaahi kama suulaysaan khayr inta uu idin ku jiro qof arkay qofkii aniga i arkay lana saaxiibay qofkii ila saaxiibay, wallaahi kama suulaysaan khayr inta uu idin ku jiro qof arkay qofkii arkay qofkii aniga i arkay, lana saaxiibay qofkii la saaxiibay qof

aniga ila saaxiibay) (Musnaf ibnu Abii Shayba), laguma faddilin dadka kusoo arooray xadiiskan gadaashooda waxan ahayn qiimaha la saaxiibitaankooda asxaabta nabiga.

Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu ku gaaryeelay qaar asxaabta ka mid ah ammaan siduu u caddeeyo horreynta ay ku horreeyaan fadliga, siiba kuwa ugu horreeyay iyaga ka mid ah, wuxuu yiri:

(أَرْحَمُ أُمَّتِي بِأُمَّتِي أَبُو بَكْرٍ ، وَأَقْوَاهُمْ فِي أَمْرِ اللَّهِ عُمَرُ ، وَأَصْدَقُهُمْ حِيَاءَ عُثْمَانَ ، وَأَقْضَاهُمْ عَلِيُّ بْنُ أَبِي طَالِبٍ ، وَأَمِينُ أُمَّتِي أَبُو عُبَيْدَةَ بْنُ الْجَرَّاحِ ، وَأَعْلَمُ أُمَّتِي بِالْحَلَالِ وَالْحَرَامِ مُعَاذٌ ، وَأَقْرَبُهُمْ أَبِي ، وَأَفْرَضُهُمْ زَيْدٌ)

(waxaa ugu naxariis badan ummadayda dhexdooda Abu Bakar, waxaa ugu adag xagga amarka Alle Cumar, waxaa ugu xishood badan Cusmaan, waxaa ugu xukun badan Cali bin Abiidaalib, Amiinka umaddayda waa Abuu Cubayda ibnu Aljarraax, ummaddayda waxaa ugu cilmi badan xalaal iyo xaaraan Mucaad, waxaa ugu akhris badan Ubay, waxaa ugu badan aqoonta dhaxalka Zeyd), maalinta uu fuulay nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – Uxud asoo la socdo Abuu bakar iyo Cumar iyo Cusmaan – *Ilaahay raalli haka noqdee* –buurta ayaa la gilgilatay iyadoo ku faraxsan nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* –

iyoo asxaabtiisa, wuxuu yiri naniga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - :

(اَثْبُتْ أَحَدٌ، فَإِنَّمَا عَلَيْكَ نَبِيٌّ، وَصِدِّيقٌ، وَشَهِيدَانِ)

(Sugnow uxudow waxaa uun korkaaga saaran nabi iyo siddiiq iyo labo shahiid) (Saxiix Albukhaari), wuxuu yiri nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – asoo caddeynaya darajada Abuu bakar iyo Cumar – Ilaahay raalli haka noqdee -:

(إِنَّ أَهْلَ الدَّرَجَاتِ الْعُلَى يَرَاهُمْ مَنْ أَسْفَلَ مِنْهُمْ كَمَا يُرَى الْكَوْكَبُ الطَّالِعُ فِي الْأُفُقِ مِنْ آفَاقِ السَّمَاءِ، وَإِنَّ أَبَا بَكْرٍ وَعُمَرَ مِنْهُمْ وَأَنْعَمًا)

(Dadka darajooyinka sare leh waxaa arkaya qofka ka hooseeya, sida loo arko xiddiga kasoo baxayo jahada ka mid ah jahooyinka cirka, Abuu bakar iyo Cumarna waxay ka mid yihiin dadkaas wayna nimcaysteen) (sunan ibnu Maajah).

Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu ahaa mid ku dadaalo inuu muujiyo qiimaha asxaabtiisa, iyo inuu caddeeyo sharftooda iyo qiimahooda, asoo dhiirragalinaya himmaddoodana kicinaya siday u noqdaan kuwa lagu daydo, wuxuu leeyahay asoo ka hadlaya Abuu bakar:

(لَا تُؤْذُونِي فِي صَاحِبِي، فَإِنَّ اللَّهَ عَزَّ وَجَلَّ بَعَثَنِي بِالْهُدَى وَدِينِ الْحَقِّ
فَقُلْتُمْ: كَذَبْتَ، وَقَالَ أَبُو بَكْرٍ: صَدَقْتَ، وَلَوْلَا أَنَّ اللَّهَ (عَزَّ وَجَلَّ)
سَمَّاهُ صَاحِبًا لَاتَّخَذْتُهُ خَلِيلًا، وَلَكِنْ أُحْوَةٌ لِلَّهِ ..)

(Ha iga dhibina saaxiibkayga, Alle wuxuu ila soo diray hanuun iyo diinta xaqqa ah, waxaad dhahdeen: been baad sheegtay, Abuu bakarna wuxuu yiri: run baad sheegaty, haddii ilaahay aan ku magacaabi lahayn saaxiib waxaan ka dhigan lahaa khaliil, laakin walaaltinnimada Alle dartiisa...) (Albukhaari iyo dad kale, Dabaraanina ayaa iska leh lafdiga), wuxuu leeyahay nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – asoo ka hadlaya Cumar – *Ilaahay raalli haka noqdee* -:

(إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى جَعَلَ الْحَقَّ عَلَى لِسَانِ عُمَرَ وَقَلْبِهِ)

(Ilaahay xaqqa wuxuu saaray carrabka Cumar iyo qalbigiisa) (Musnad Axmed), wuxuu leeyahay nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – asoo ka hadlaya Cusmaan – *Ilaahay raalli haka noqdee* –

(أَلَا أَسْتَحِي مِنْ رَجُلٍ تَسْتَحِي مِنْهُ الْمَلَائِكَةُ)

(Miyaanan ka xishooneynin qof ay malaa'igta ka xishooto) (Saxiix Muslim), wuxuu yiri asoo ka hadlaya Cali – *Ilaahay raalli haka noqdee* -:

(أَنْتَ مَيِّ وَأَنَا مِنْكَ)

(Adiga waad iga mid tahay anigana adaan kaa mid ahay) (Bukhaari iyo Muslim).

Qofka raaraaca axaadiista nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – uu kaga hadlay asxaabtiisa iyo siduu ugu markhaati kacay wuxuu ogaanayaa in nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – uu sameeyay tusaalooyinka ugu fiican xagga jacaylka dhabta iyo oofinta iyo dhaqanka suuban oo uu kula dhaqmay asxaabtiisa, qaab aan waligiisa la arkin, wuxuu ahaa nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – mid dareemo xanuunkooda una dhimriyo kooda maqan raadiyo kooda xanuunsan booqda, janaasadoodana xaadira, yeeritaankoodana ajiiba, arrikana kala tashada, una naxariista, deyntana ka guda, una duceeya iyaga iyo ubadkooda, Caa'ihso waxaa laga wariyay – *Ilaahay raalli haka noqdee* – inay tiri: nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu usoo galay Cusmaan bin Mathcuun – *Ilaahay raalli haka noqdee* – asoo meyd ah wuu ku duubsamay wuuna dhunkaday, kaddib wuu ooyay ilaa aan ka arko illintiisa oo ku daadanayso dhabannadiisa) (musanaf Cabdirasaaq), wuxuu raadiyay nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – asxaabtiisa maalin markii uu dhammaaday dagaal ka dhexeeyay iyaga iyo mushrikiinta, wuxuu ku yiri: **(qof miyaad la'dihiin?)**,

waxay dhaheen: haa, habel iyo hebel iyo hebel, kaddib wuxuu yiri: **(qof miyaad la'dihiin?)** waxay dhaheen: haa, habel iyo hebel iyo hebel, kaddib wuxuu yiri: **(qof miyaad la'dihiin?)** waxay dhaheen; maya, wuxuu yiri: **(laakin aniga waxaan la'ahay Julaybiin ee raadiya)** waxaa lagasoo raadiyay dadka la dilay, waxay haleen isgoo dhinac yaalla toddobo oo isaga dilay kaddib way dileen, nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – ayaa yimid wuu dul istaagay wuxuuna yiri: **(toddobo ayuu dilay kaddib way dileen, kan aniga ayuu iga mid yahay anigana isagaan ka mid ahay)** kaddib nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu saaray labadiisa dhudhun, mana lahayn waxaan dhudhumada nabiga ahayn ilaa qabrigiisa laga galiyo) (Saxiix Muslim), wuxuu leeyahay nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

(أَنَا أَوْلَىٰ بِكُلِّ مُؤْمِنٍ مِنْ نَفْسِهِ ، مَنْ تَرَكَ مَالًا فَلِأَهْلِهِ ، وَمَنْ تَرَكَ دِينًا ،
أَوْ ضِيَاعًا ، فَإِلَيَّ وَعَلَيَّ)

(Anaa kaga dhow mu'min kaste naftiisa, qofka hanti ka tago ehelkiisa ayaa iska leh, qofka deyn ama wax dayacan ka tago xaggayga iyo dushayda ayay ahaadeen) (Saxiix Muslim)

Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxamed uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Walaalaha islaamka ahow:

Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – dhammaan umadda wuxuu ula dardaarmay asxaabtiisa oo dhan, wuxuu ka digay in xumaan loo geysto, ama xaqqooda wax loo dhimo, wuxuu caddeeyay in jacaylkooda daliil u yahay jacaylkiisa, nacaybkoodana daliil u yahay nacaybkiisa, wuxuu yiri - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(اللَّهُ اللَّهُ فِي أَصْحَابِي ، لَا تَتَّخِذُوهُمْ غَرَضًا بَعْدِي ، فَمَنْ أَحَبَّهُمْ
فِي حُبِّي أَحَبَّهُمْ ، وَمَنْ أَبْغَضَهُمْ فَبِئْغُضِي أَبْغَضَهُمْ ، وَمَنْ آذَاهُمْ فَقَدْ

آذَانِي ، وَمَنْ آذَانِي فَقَدْ آذَى اللَّهَ (عَزَّ وَجَلَّ) ، وَمَنْ آذَى اللَّهَ يُوشِكُ أَنْ يَأْخُذَهُ

(Ilaah kagaga baqa asxaabtayda, hana ka dhiganin gadaashayda wax lagu shiish barto, qofkii jeclaado jacaylkayga ayuu u jeclaaday qofkii nacana nacaybkayga ayuu u nacay, qofkii dhibana anuu i dhibay, qofkii i dhibana Ilaahay ayuu dhibay – *cazza wajalla* -, qofkii Ilaahay dhibana waxaa dhow inuu qabto) (Axmed iyo Tirmithi), wuxuu nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* yiri:-

(لَا تَسُبُّوا أَصْحَابِي ، فَلَوْ أَنَّ أَحَدَكُمْ أَنْفَقَ مِثْلَ أُحُدٍ ذَهَبًا مَا بَلَغَ مُدًّا أَحَدِهِمْ ، وَلَا نَصِيفَهُ)

(Ha caayiina asxaabtayda, midkiina hadduu bixiyo dahab Uxud u dhigmo ma gaarayo midkooda madaalkiisa xataa nuskiisa) (Bukhaari), wuxuu leeyahay rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* –:

(إِنَّ اللَّهَ تَبَارَكَ وَتَعَالَى اخْتَارَنِي وَاخْتَارَ بِي أَصْحَابًا ، فَجَعَلَ لِي مِنْهُمْ وُزْرَاءَ وَأَنْصَارًا وَأَصْهَارًا ، فَمَنْ سَبَّهُمْ فَعَلَيْهِ لَعْنَةُ اللَّهِ وَالْمَلَائِكَةِ وَالنَّاسِ أَجْمَعِينَ ، لَا يُقْبَلُ مِنْهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ صَرْفٌ وَلَا عَدْلٌ)

(Ilaahay wuu i doortay wuxuuna ii doortay asxaab, wuxuu iiga dhigay tageereyaal iyo gargaareyaal iyo soddogyo, qofka caayo waxaa korkiisa ah lacanadda Ilaahay iyo malaa'igta iyo dadka oo dhan, mana laga

aqbalayo maalinta qiyaame furasho iyo fidyo)
(Almustadrak calasaxiixyan).

Qofka eegaya siirada asxaabta rasuulkii Alle - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -, wuxuu ogaanayaa inaysan ku gaarin darajadan sare iyo jagadan korreysa ikhlaaskooda waxan ahayn, iyo jacaylkooda rasuulkiisa - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -, iyo la jihaadka naftooda iyo u hiilinta xaqqaiyo difaaciisa, iyo doorashadooda maslaxadda guud iyo ka hormarintooda maslaxadda gaar, iyo akhlaaqdooda suuban iyo dhaqankooda wanaagsan oo ay dadkoo dhan kula dhaqmayeen, waxay muteysteen ammaanta Ilaahay – *cazza wajalla* – waxayna ahaayeen kuwa istaahila jacaylka nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – iyo inay noqdaan kuwa uu ku kalsoonaado, maxaa ka fiican qofka yiri:

هم صفة الأقبال فاعرف قدرهم * وعلى هداهم يا موفق
فاهتد

**Iyaga waa dadka ugu fiican ee garo qiimahooda *
hanuunkoodana ku soco midka tawfiiqda haystow.**

Jiilka asxaabta – *Ilaahay raalli haka noqdee* – waxay ku hormareen doorinta nolosha iyo baabi'inta mugdida baadilka iyo eexashada iyo dulmiga oo adduunka dacalladiisa buuxiyay soosaaridda nabaiga kahor, waxay

ugu baddaleen iftiinka waxyiga ilaahiga, xaq iyo cadaalad iyo sinnaan, sidaa awgeed jacaylka asxaabta rasuulkii Alle - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – waa sunno, in loo duceeyana waa cibaado, in lagu daydana waa wasiilo, in raadkooda la raacana waa fadiilo, Alle –*subxaanahu* – wuxuu leeyahay markuu sheegay tilmaanta muhaajiriinta iyo ansaarta:

(وَالَّذِينَ جَاءُوا مِنْ بَعْدِهِمْ يَقُولُونَ رَبَّنَا اغْفِرْ لَنَا وَلِإِخْوَانِنَا الَّذِينَ سَبَقُونَا بِالْإِيمَانِ وَلَا تَجْعَلْ فِي قُلُوبِنَا غِلًّا لِلَّذِينَ آمَنُوا رَبَّنَا إِنَّكَ رَءُوفٌ رَحِيمٌ)

(Kuwa yimid asxaabta Nabiga kadib waxay oranayaan rabbiyow noo dhaaf annaga iyo walaalaheena iimaanka nagaga hormaray hana u galinin qalbigeena xiqdi kuwa rumeeyay rabbiyow waxaad tahay dhimriye oo naxariiste ah), imaam Raazi –*Ilaahay ha u naxariistee* - wuxuu yiri: waxaa laga rabaa qofka yimid muhaajiriinta iyo ansaarta gadaashooda inuu ku xuso duco iyo naxariis.

Waxaan adkaynaynaa ka sheekaynta darajada asxaabta sauulkii Alle - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – iyo caddeynta fadligooda inuu xoojinayo kaalinta ku dayashada wanaagsan oo lagama maarmaan ay u tahay wiilasheena iyo dhalinyaradeena, in laysku abaabiyo ku dayashada waxay ku leedahay saameyn

xeeldheer xoojinta akhlaaqda wanaagsan iyo dhaqanka suubaan guud ahaan bulshada, gaar ahaan ubadka iyo dhalinyarada, dhalinyaradeena waxaa laga rabaa inay qaataan fikirka dhexdhexaadka oo ka dhashay fahanka asxaabta rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – ee saxa ah oo ay islaamka u fahmeen, iyo inuu lahaado shakhsiyaddiisa u gaarka ah si uu u noqdo mid qaadi karo risaalada oona gudan karo amaanada, doonta badbaadadana hoggaamin karo, si uu uga badbaadiyo umadda jahawareerkeeda iyo dhidhicitaankeeda, iyo inuu gaarsiiyo waddada hanuunka iyo amaanka iyo liibaanta iyo xasilloonida iyo horumarka.

Maxaan u ogaan weynay qiimaha asxaabta nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – iyo darajadooda, maxaan ugu dayan weynay akhlaaqdooda oo aan u raaci weynay raadkooda, siiradoodana aan u qaadan weynay iyo huridda iyo wax bixinta iyo siismada iyo ku furashada nafta iyo hantida iyo ubadka, oo aan ugu socon weynay jidkooda si loo camiro koonkan, xadaaradana loo sameeyo, iyo in lagu anfaco dalka iyo dadka wixii muujinaya dhabta Islaamka iyo sahlanaantiisa.

**Rabbiyow noo dhaaf annaga iyo walaalaheena
iimaanka nagaga hormaray hana u galinin qalbiga**

**xiqdi kuwa rumeeyay rabbiyow waxaad tahay
dhimriye oo naxariiste ah**